




Calgary



# Vehicle for Hire



**WARBIXINTA # 003**

**DIB-U-CUSBOONAYSIINTA SHATIGA TAARGADA EE LIMOUSINE**

**AGOOSTO 2026**

Muddada cusboonaysiinta 2026 ee Shatiga Taargada Limousine (LPL) ayaa dhawaan soo socota. Vehicle for Hire waxay ku faraxsan tahay inay kula wadaagto warbixin taasoo ka dhigaysa cusboonaysiinta taargada limousine-kaaga mid fudud oo dabacsan.

Laga bilaabo mudada cusboonaysiinta 2026, dadka haysta taargada waxay dooran karaan ikhtiyaarka cusboonaysiinta aadka ugu habboon iyaga. Halkan waxaa ku xusan waxa isbeddelaya: Hadda waxaad ku cusboonaysiin kartaa taargada limousine-kaaga khadka tooska ah iyada oo loo marayo barteena cusub ee Vehicle for Hire- looma baahna booqasho foolka-fool ah!

1. **Fadlan ka xaqiiji iimaylkaaga xafiiska Vehicle for Hire ka hor intaadan gelin barteena intarneetka**
2. Booqo [vehicleforhire.calgary.ca](https://vehicleforhire.calgary.ca) ama iskaan garee koodka QR ee hoos ku qoran si aad u gasho barteena intarneetka

U Cusbooneysiiso si foolka-fool ah haddii aad doorbidayso—adeeggu waxaa sidoo kale laga heli doonaa xafiiska Vehicle for Hire.

Sannadka 2026, marka la cusboonaysiiyo taargada limousine-ka ee uu qof haysto, taariikhda uu dhacayo waxaa la waafajin doonaa **taariikhda dhalashada qofka haysta taargada**. Taariikhaha dhacistaanka ee taargada limousine-ka uu dilaalka haysto waxay ahaan doontaa Sibteembar sannad kasta.

Kharashka dib-u-cusboonaysiinta shatiga taargada ee limousine-ka (L.P.L.) waa \$340.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan ikhtiyaarka cusboonaysiinta ee onlaynka ah, fadlan nagala soo xiriir: [Xafiiska Vehicle for Hire](#).

Farriintan waxaa loo turjumay Af-Amxaari, Af-Carabi, Af-Faransiis, Af-Hindi, Af-Bunjaabi, Af-Soomaali iyo Af-Urduu. Guji [halkan](#) si aad u eegto dukumentiyada.

Mahadsanid,

**Kristin Marriott**

Ku Xigeenka Madaxa, Vehicle for Hire

Maaraynta Xaaladaha Deg-dega ah iyo Amniga Bulshadda

